Kansarka aan la daawayn karin

Hadii kansarku uusan ku joogsan daaweynta, unugyada kansarka waa ka dhaqaaqi karaan meesha kansarku ka bilowday. Waa ay fidi iyagoo raacaya dhiiga ama habdhiska qanjirada iyagoo u gudbaya qeybaha kale ee jirka. Unugyadu waxay kansar cusub ku dhalin karaan qeybaha kala duwan ee jirka. Tani waxaa lagu magacaabaa metastasis. Unugyada kansarka waxa ay ku fidi karaan in ka badan hal meel oo jirka ah.

Kansarada qaar lama daaweyn karo , xitaa hadeysan fidin. Dhaqaatiirtu waa ay awoodaan in ay sheegaan hadii ay suurto gal tahay in qofka kansarkiisa la daaweyn karo.

Daaweynta

Daaweyntu waxay cawami kartaa xukumida calaamadaha iyo fidida kansarka, xitaa kansarka aan la daaweyn Karin. Dadka qaar qaba kansarka aan la daaweyn Karin waxaa kansarkooda la xukumi karaa bilo ama sanado. Waxaa laga yaabaa in ay qaataan daaweyn dhowra xilligaas.

Dadka qaar waxa ay ka qeyb qaataan tijaabooyinka bukaan eegida tani waxay tijaabineysaa daaweyno cusub si loo eego in ay ka wanaagsan yihiin daaweyntii horey u jirtay. Hadii aad xiiseyneyso, waydii dhaqtarkaaga hadii ay jirto bukaan eegid tijaabo ah oo adiga kugu haboon.

Dadka qaar waxa ay doortaan in ay joojiyaan daaweynta. Waxayna ka jecel yihiin in ay u isticmaalaan waqtigooda waxyaabo kale. Tani waa go'aan shaqsiyeed. La hadalka dhaqtar ama talasiiye waa ay ku cawimi.

Ka hadalka waxa ku saabsan kansarka

Dadka si kala duwan ayey u niyad kacaan marka loo sheego in kansarkooda aan la daaweyn karin. Dadka waxay noqon karaan dareen la'aan, xanaaq, cabsi ama murugo. Dadka qaar waxa laga yaabaa in ay si fiican kansarka ugu dulqaataan markey dareenkooda ka hadlaan. Inta badan dadku uma baran inay kala hadlaan waxay ka walwal qabaan qoyskooda iyo saaxiibadood. La hadalka la taliye waa ay ku cawimi.

Waxaa jira kooxaha wax cawima dhamaan Melbourne iyo Victoria meelahaas oo ay dadka kansarka qaba ay iskugu yimaadaan oo ay ku wada hadlaan. Dadku awood ayey ka helaan wadawadaaga dareenkooda. Xitaa, inta badan waa ay qoslaan.

Hadii aad qabto kansar, aad bey u adag tahay in aad u sheegto dadka. U sheegida dadka yaryar aad bey qaasatan u adag tahay. Caadiyan waa ay fiican tahay in runta laga sheego waxa dhacaya iyo waxa dhici doona mustaqbalka.

Daaweynta calaamadaha

Dadka qaar qaba kansarka aan la daaweyn Karin xanuun ma laha. Dadka qaarna xanuun bey leeyihiin. Tusaale ahaan, kansarku waa uu weynaan karaa oo uu cadaadin karaa xubin

taasoo xanuun keeni kara. Daaweyntu waa ay dhimi ama fududeyn xanuunka iyo calaamadaha kale.

Tusaale ahaan,shucaac ku daaweynta (radiotherapy) waa ay yareyn kartaa kansarada qaar, ama kansarka waxaa lagu saari karaa qaliin.

Xanuunka waxaa si fiican loogu xukumi karaa daawooyinka. Qofka waxa uu xaq u leeyahay in uu qaato daawo ka dhinta xanuunka.

Dadka qaar waxa ay ka walwalaan in ay qabitimaan hadii ay qaataan daawooyin sida morphine. Qabatin lagama yaabo in uu dhaco hadii daawooyinkan loo qaato xanuunka kansarka.

Hadii uu ku hayo xanuun, ogeysii kalkaaliyahaaga iyo dhaqtarkaaga si ay kaaga daaweeyaan. Hadii qoyskaaga ay ka walwalaan qabatinka, weydiiso dhaqtarkaaga in uu u xaqiijiyo.

Waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad la hadasho cilmi nafsi ku taqasuse hababkii aad ugu dulqaadan lahayd xanuunka. Waxay kaa cawimi inaad isdejiso iyo sidii aad ku baran lahayd inaad ku fikirto waxyaabo kale oo aaan ahayn xanuunkaaga.

Somali

Cancer that cannot be cured

Qadka warbixinta kansarka:

- **Somali**
  (03) 9209 0169
- **English**
  131120

1 Rathdowne Street
Carlton Vic 3053
Australia
Telephone: 61 (0)3 9635 5000
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270
enquiries@cancervic.org.au
www.cancervic.org.au

January 2004

Kansarka aan la daawayn karin

Helid cawimaad

Qofka qaba kansarka aan daawada lahayn waxaa laga yaabaa in uu dareemo caafimaad. Laakiin marmar kansarka wuxuu qofka ka dhigi karaa inuu dareemo xanuun ama daal. Daawada kansarka waxay xitaa dadka dareemaan caafimaaad la'aan.

Saaxiibada iyo qoyska ayaa laga yaabaa in ay rabaan in ay ku cawimaan. Waxyaabaha ay sameyn karaan waxaa ka mida cawimaad xagga guriga, beerta iyo karinta. Marmarka qaar waa ay fiican tahay in saaxiib kula joogo xilliga lagu daaweynayo.

Dadka qaar ma yaqaanaan siday ugu dulqaadan lahaayeen markey qof ay jecel yihiin ku dhoco kansar. Hadii aad qabto kansar, oo qoyskaaga ama saaxiibadaa ay ku dhibto walwalkooda, waa ay ku cawini hadii aad daacad u noqoto baahidaada. Hadii ay taasi kugu adkaato, ka doono cawimaad dhaqtarkaaga, kalkaaliye, bulsho u shaqeeyaha isbitaalka dhexdiisa ama caafimaad ku taqasusayaasha kale sida psychologists ama psychiatrists.

Dhaqaalaha iyo walaacyada kale

Dhibaatooyin badan oo lacageed xitaa ayaa adkeeya sidii loogu dulqaadan lahaa. Dadka kansarka qaba waxaa laga yaabaa in ay u baahan yihiin talo ku saabsan inay fasax ka qaataan shaqada ama in loo soo hormariyo lacagtoodii gabowga (superannuation). Dadka shaqeeya iyo kuwa aan shaqeyn waxa ay ogaan karaan in ay xaq u leeyihiin mushaarada jirada ama cuuryaanimada.

Dadka qaba kansarka waxaa laga yaabaa in ay u baahan yihiin warbixin xaga qorida dhaxalka, awoodsiinta qareenka (loo ogolaanayo sharciyan in ay go'aamada u gaaraan dadka qareenadu) iyo aasida. Waxaa jira warbixino badan oo kuula diyaara cawimaad.

Helida warbixino badan

- Kansar – weydii dhaqtarkaaga, ama soo wac qadkayaga warbixinta kansarka
- Ururada taageerida iyo kulanada warbixinsiinta – soo wac qadkayaga warbixinta kansarka
- Xanuun iyo calaamadaha kale – la hadal dhaqtarkaaga iyo kalkaaliyaha.
- Cawimaad guriga – the Royal District Nursing Service ayaa dadka ku xanaaneeya gurigooda. Wac (03) 9536 5222. manashiibiyada xaafada ayaa kuu sheegaya adeegyada xaafada. U adeegaha bulshada ee isbitaalkaaga ayaa xitaa ku cawimi kara.
- Nafaqada, qaasatan hadii aad lalabooto ama uu miisaankaaga hoos u dhaco – la hadal cunto yaqaanaha isbitaalka.
- Xaaladaha sharciyada – la hadal qareenkaaga ama la taliyahaaga sharciga. Hadii aadan lahayn mid, kala hadal bulsha u shaqeeyaha isbitaalka.
- Xaalada dhaqaalaha – waxaa laga yaabaa in bulsho u shaqeeyaashu kaa cawimaan. Centerlink ayaa kuugu baaqi warbixin ku saabsan mushaarooyinka cuuryaamida, jirada iyo xanaaneynta ee Commonwealth. Wac 13 27 17 ama booqo website ka Centrelink www.centreling.gov.au.
- Xanaana da dadka aan noLoL rajo Ka qabin – waa adeeg ugu baaqa xanaanayaasha ka cawima dejinta oona xanaaneeya dadka aad u jiran. Xanaanadan waxaa lagugu siin karaa isbitaalka ama guriga. Wac palliative Care Victoria (03) 9662 9644.
- Dhimasho iyo tiiraanyo – waxa laga yabaa in la taliyaha uu ku cawimo, ama culamaudiin. Waxaa xitaa jira oo ka shaqeeya isbitaalka wadaadka kaniisada. The National Association for loss and Grief waxay dadka la xiriiriyaan la taliyaasha murugada ee qeybtooda. Wac (03) 9351 0358 ama 1800 100 123 (waa bilaash ka wacida banaanka Victoria)

Hadii aad u baahan tahay turjubaan markaad la hadleyso ku taqasusayaasha caafimaadka weydiiso in mid laguu qabto. Xasuusi dhaqtarkaaga, kalkaaliyahaaga ama bulsha u shaqeeyahaaga in ay kuu qabtaan turjubaan.

Somali

Cancer that cannot be cured

Qadka warbixinta kansarka:

- **Somali (03) 9209 0169**
- **English 131120**

1 Rathdowne Street
Carlton Vic 3053
Australia
Telephone: 61 (0)3 9635 5000
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270
enquiries@cancervic.org.au
www.cancervic.org.au

January 2004